

Si wadajir ah ayaynu

u joojinaynaa kirooyin

suuqu xukumo

Dawladda ayaa si wadajir ah xisbiyada Centerpartiet iyo Liberalerna ula go'aansatay in kirooyin suuqu xukumo loo dhaqan gelin karo dhammaan hantida la kireysto. Taas waxaanu doonaynaa inaanu joojino oo waxaanu u baahanahay caawimaadaada!

Waxaanu aaminsanahay in aragti ahaan ay micnaheedu noqon lahayd in kiro suuqu xukumo ay galaan dhammaan guryaha maadaama wada xaajoodka wadajirka ah uu meesha ka baxayo. Marka qof walba keligiis wada xaajood galo waxaa kordhaysa khatarta ah in qofka lacagta ugu badan ku bixin kara kiro uu helo gurigaas. Kirooyinka suuqu xukumo micnahoodu wuxuu noqon doonaa kirooyin aad u sareeya oo ay la kulmaan dadka badankoodu. Xaafadaha qaarkood waxaa kirada kor loo kicin lahaa ilaa iyo boqolkiiba 50.

Sidaas darteed waa in aynu u muujino siyaasiyiinta in aynu nahay dad badan oo aaminsan in kirooyin suuqu xukumo ay tahay fikrad aad u xun.

Baro dheeraad ku saabsan kirooyinka suuqu xukumo oo iska abaabul: hyresgastforeningen.se/marketrents